



ILAAALINTA CAAFIMAADKA GURIGAAGA IYO QOYSKAAGA

Yaree u dhawaanshaha **PFAS**
(maadooyinka per- iyo polyfluoroalkyl)



Daabacaada: 20-04-043SO
Meey 2024

Si aad u codsato caawimaada ADA, kala xiriir Ecology taleefanka oo ah 360-407-6700 ama ciwaanka iimeelka hwtrpubs@ecy.wa.gov. Adeegyada Washington Relay ama TTY wac 711 ama 877-833-6341.

MAXAA LOO ADEEGSADAA WAASE MAXAY SABABTU?

PFAS waa koox kiimikooyin ah oo gacan ka gaysta abuurista difaaca biyaha iyo daxalka. Waxay ka hortagaan qoyaanka, taasoo ah sababta shirkado badan oo wax soo saar ugu adeegsadaan badeecooyinkooda,^{1,2} sida:



Qalabka wax lagu kariyo ee aan cuntada qabsan



Kunteenarada cuntada lagu qaato



Roogaga iyo dharka



Xunbada dab-damiska



Koolada biyaha celisa



Nadiifinta alaabta



Daawooyinka daxalka iyo kuwa biyaha celiya

WAA MAXAY PFAS?

PFAS waa koox kiimikooyin sun ah oo ku jira alaabteena, guryaha, jirka, iyo bii'ada kuwaasoo aan marna gebi ahaan baabi'in.



PFAS marna kama dhamaato bii'ada, taasoo ah sababta loogu magacaabay **"kiimikooyinka abadiyan jira."**

43 gobal

ayaa leh biyo ku sumoobay PFAS, taasoo saameyn ku yeelatay in ka badan

19 milyan oo qof.



Xunbada dab-damiska

ayaa ah isha ugu wayn ee sunta PFAS ee

biyaha la cabo ee gobalkeena.



Inta badan

100%

dadka Mareykanka ayaa leh nooc uun kamid ah

PFAS

oo ku jirta dhiigooda.



¹ <https://ecology.wa.gov/Safer-Products-WA>

² <https://apps.ecology.wa.gov/publications/summarypages/2004019.html>

SIDEE AYAAN **UGU DHAWAAN KARAA?**

Maadaama alaabaha gurigaaga yaala duqoobaan muddo kadib, PFAS ayaa ka soo bixi karta. Tusaale ahaan, dilaaca iyo jeexdimaha maalin kasta ee kursigaaga fadhiga ayaa siidayn kara PFAS. Kadib marka la siidaayo, PFAS ayaa ku uruuraysa boorka iyo hawada gurigaaga.



Qaababka ugu badan ee aan ku qaadno sunta waxaa kamid ah:



Cunista cuntoma biyo sumaysan.

AMA


Taabashada maadooyinka ay ku jirto sunta PFAS.



Maxay PFAS ugu jiraan biyaheena?

Xunbada dab-damiska ee ay ku jirto PFAS ee ku daadata dhulka ayaa ah hal qaab oo nidaamyadeena biyuhu ku sumoobaan.


★ Tallaabada la qaado si loo yareeyo u banbixida PFAS



In ka badan
\$1M

Qiimaha rakibaada nidaamka sifeeya PFAS ee lagu xiro hal nidaam oo biyaha sumaysan ah.

SIDEE AYAY II SAMAYN KARAAAN **ANIGA?**



Sunta nidaamka difaaca jirka


Sunta taranka



Sunta kobaca



Kansarada qaar



Sunta xubnaha jirka




MAXAAN SAMAYN KARAA SI AAN UGA HORTAGO U BANBIXIDA?

Halkaan waxaad ka helaysaa qaar kamid ah talaabooyinka aad qaadi karto si aad u yareyso khatarta PFAS ee gurigaaga:



Soo iibso alaabo aan lahayn PFAS. Ka difaac PFAS si aysan u gelin gurigaaga adoo ka codsanaaya tafaariiqleeyda maadooyinka ku jira badeecadooda.

Iska ilaali alaabaha loo suuq geeyo inay ka hortagaan daxalka iyo biyaha. Iswaydii, “Badeecadaan gurigayga si dhab ah ma ugu baahan tahay inaysan daxalaysan? Ma wax u baahan baa inaan markasta dhaqo?”



Si joogto ah u haawi oo busta uga jaf gurigaaga.

PFAS ayaa ku uruuri karta busta iyo agabka sida rooga. Si joogto ah u tirtir dusha meelaha, oo adeegso huufar leh sifeeyaha HEPA si aad u yareyso u banbixida. Tan ayaa si gaar ah muhiim u ah si loo difaaco carruurta iyo xayawaannada wakhtiga badan ku qaata sagxada.

Ku dhaaf kabahaaga albaabka Waxaan kiimikooyinka gurigeena ku soo gelin karnaa kabaha.



Iska ilaali qalabka wax lagu kariyo ee aan cuntadu qabsan intii karaankaa ah. Adeegsiga bacda kuukarka ee aan cuntadu qabsan ayaa PFAS ku siidayn karta guriga. Iskuday inaad ku kariso birdaawada badelka taas. Haddii aad adeegsato qalabka wax lagu kariyo ee aan cuntadu qabsan, ku hay kulaylka heer ka hooseeya 400° F, oo jooji adeegsiga birdaawada marka ay soo fuqfuqdo ama xoqanto.

Haawi gurigaaga. Furista daaqaadaha ayaa kaa caawinaysa in hawadu soo gasho guriga kana hortagaysa u gaarista kiimikooyinka sunta ah ee la socota hawada iyo busta gudaha.